

Supreme Court Chairman Direction 2005: Liability of employers under the Civil Code in respect of road accidents

Wareegto Garsoore oo Guddoomiyaha Maxkamadda Sare ee Somaliland, 1 Feb, 2005, ka soo saaray xukunka Mag-bixinta shilalka Gaadiidka.

Guddoomiyaha Maxkamadda Sare, Dr. Faysal X. Jaamac Geeddi

Maxkamadda Sare ee Somaliland:

Markay aragtay: Qodobka 131 (5) ee Dastuurka Somaliland.

Markay dareentay: in loo baahan yahay in lagu baraarujiyey hay'adda Garsoorka ku dhaqanka ay ka midaysan yihiin ee Xeerka Madaniga Soomaaliyeed. (law No. 2 of june, 1973, No. 37) oo dalka lagaga dhaqmi jiray) ka hor intaan Jamhuuriyadda Somaliland gooni-isu-taagin.

Markaanu tixgelinay: baahida loo qabo ku dhaqanka Fasiraada Xeerka qodobada sharci ee loo cuskan doono magdhowga ka dhasha shilalka Gaadiidka, waxaana soo dhexgeli doona masuuliyadda wadaha la xidhiidha, qaar la xidhiidha hantiilaha gaadiidka.

- I. Sharciga loo tixgelin doonaana furitaankooda iyo go'aan ka gaadhistooda waxa weeye: qodobada: 160,161 (1) ee Xeerka Madaniga oo lala akhriyo Qod. 171 (1) ee Xeerka Madaniga ee ku saabsan Masuuliyadda taabica iyo matbuuca.
- II. Qiimeynta Magdhowga waxaa loo tixgelin doonaa Shareecada Islaamka oo Geel ah, iyada oo Maxkamadda sare ee dalkeenu hore halaha Geel ah lacag ahaan ugu qiimeysay laba Boqol oo kun Shillinka Soomaaliga ah s/sh 200,000 /-